

# Marka u-adeege bulsho oo ka tirsan

## Waaxda Adeegga Qoyska uu Kugu Soo Booqdo Gurigaaga



### Waxaad u leedahay xuquuq inaad:

- Waydiiso inaad aragto Kaadhka Aqoonsiga ee Shaqaalaha Dowladda ka hor inta aadan u ogolaan qof shaqaale ah inuu galo gurigaaga;
- Wacdo xafiiska Waaxda Adeegyada Qoyska (FSD) si aad u xaqiijiso aqoonsiga shaqaalaha;
- Waydiiso su'aalo haddii aadan fahmayn waxa shaqaalaha uu sameynayo ama uu ku farayo inaad sameyso;
- Dheh maya, kaddibna waydii inaad la hadasho kormeeraha shaqaalaha haddii aadan ku faraxsanayn waxyaabaha lagu waydiinayo inaad sameyso;
- Waydiiso inaad aragto amar maxkamadeed haddii shaqaalaha uu doonayo inuu ilmahaaga kala baxo gurigaaga; iyo
- Wacdo 911 ama booliska deegaanka haddii aad ka shakiso in qofka uu isku ekaysiinayo shaqaale u adeega bulshada oo ka socda waaxda FSD.

### Waxaad rajeyn kartaa waxyaabaha soo socda:

- Haddii shaqaalaha looga baahan yahay inuu indha-indheeyo gurigaaga, asaga ama ayada waa inuu waydiistaa fasax. Haddii aadan ku faraxsanayn arrintan, shaqaalaha wuxuu kaala hadli karaa tallaabooyinka kale ee suurta-galka ah ee soo socda.
- Shaqaalaha waxaa laga yaabaa inuu ku waydiiyo su'aalo ku saabsan xubno ka tirsan qoyska ballaaran, saaxiibbada, iyo kuwa kale oo laga yaabo inay awood u leeyihiin inay ku caawiyaan.
- Shaqaalaha waxaa laga yaabaa inuu ku waydiiyo in gabal maro ah laga faydo ilmahaaga si uu u arko nabar, ama dhaawac jirka ah oo soo gaaray ilmaha. Waxaa la sameynayaa arrintan iyadoo qof kale oo weyn uu goobta ku sugan yahay. Shaqaalaha waxaa laga yaabaa inuu waydiiyo inaad u qaaddo ilmaha dhakhtarka.
- Shaqaalaha waxaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu si gaar ah ula hadlo ilmahaaga isagoo ka wareysanaya sida xaalku yahay. Shaqaalaha looma baahna inuu kaligiis la joogo ilmahaaga. Waxay fariisan karaan, tusaale ahaan, daaradda guriga, ama meel kale oo aad ka arki kartid ilmahaaga, balse aadan ka maqli karin wada-sheekeysiga.

### Xafiisyada Degmada ee Adeegyada Qoyska

**Barre:** (802) 479-4260

**Bennington:** (802) 442-8138

**Brattleboro:** (802) 257-2888

**Burlington:** (802) 863-7370

**Hartford:** (802) 295-8840

**Middlebury:** (802) 388-4660

**Morrisville:** (802) 888-4576

**Newport:** (802) 334-6723

**Rutland:** (802) 786-5817

**Springfield:** (802) 885-8900

**St. Albans:** (802) 527-7741

**St. Johnsbury:** (802) 748-8374

*Saacado kaddib, maalmaha fasaxa ee usbuuca ama maalmaha fasaxa ee gobolka, wac 1-800-649-5285*

<http://dcf.vt.gov/fsd>